## Mudada karantiilka guriga waa imisa?

Mudada karantiilka guriga waa ay u kala duwan tahay qof walbo.

Kalkaalisada Caafimaadka Shacabka ayaa kuu sheegi doonta marka aan loosi baahneyn karantiilka guriga, dibna aad u bilaabi karto howlahaaga caadiga ah. Guud ahaan, jawaabtaada baaritanka xaaqada, u dulqaadashada daaweynta TB-ga 2 isbuuc ama wax ka badan, iyo soo roonashaha.

Xitaa markaa soo fiicnato, waxaa muhiim ah in aad qaadato dhamaan dawooyinkaga TB-ga sida uu kugu amray Adeeg Bixiyaha Xanaanada Caafimaadka.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeri ah ee caafimaadka maskaxda inta aad karantiilka ku jirto, waxaad kalasoo xiriirta fadlan ConnexOntario taleefanka 1-866-531-2600, si bilaash ah 24/7 u heli karto ama booqo adeegyada kaalmada caafimaadka maskaxda.

Si aad wax badan uuga barato adeegyada WECHU, fadlan wac Waaxda Kahortaga Caabuqa Cudurada **519-258-2146 ext. 1420** ama booqo bogga Internetka: *www.wechu.org*

WINDSOR-ESSEX COUNTY HEALTH unit
Bureau de santé de Windsor-comté d'Essex

**Waxaa laga soo xigtay ayadoo fasax loo heysto Caafimaadka Shacabka Toronto**

**May 2025**


# Karantiilka Guriga Ee Qaaxada (TB)



# Waa maxay karantiilka guriga?

Kalkaalisada Caafimaadka Shacabka ayaa kugu amartay in aad **joogto guriga inta aad gudbin karto caabuqa, tani waxaa loo yaqaan "karantiilka guriga"**.

Haddii aad ka qabto cudurka TB-ga sanbabaha ama dhuunta, waxaad ugu gudbin kartaa TB-da dadka hawada marka aad qufacdo, hindhisto, hadasho, qososho, ama heesto. Waxaa muhiim ah in aad guriga joogto oo aad isku karantiisho.




Waxaa lagaa rabaa in aad ku karantiil ahaato gurigaaga ama taa badalkeed hooy laguu diyaariyay ayada oo ay ku xiran tahay xaalada jirto ilaa Kalkaalisada Caafimaadka Shacabka ay ka go'aansato in aadan faafin karin caabuqa. Karantiilka guriga waxa uu caawinaya ka hortaga faafida TB-da sababtoo ah waxa aad joogeysa guriga adigoo ka fog dadka kale oo aad qaadsiin laheyd.

Karantiilka guriga sidoo kale waxa uu jirkaaga siinaya waqti ay daawadu ku shaqeyso si markaas uu caabuqa kaaga suulo.

Kalkaalisada Caafimaadka Shacabka ayaa si joogto ah kuula socon doonto adiga iyo xaalkaaga halka uu marayo. Waxaa lagu weydiin doona in aad keento xaaqadaada si loo ogaado marka uu caabuqa faafaya kaa suulo. Markii xaaqadaada laga waayo jeermiska TB-da, kalkaalisadaada ayaa kuu sheegi doona in aad ka bixi karto karantiilka guriga dibna ugu laaban karto howlahaaga caadiga ah.

# Sida loo difaaco qoyskaaga iyo kuwa kugu hareereysan?

**MARNABA HA** ku casuumin marti gurigaaga ama ha booqan dad kale. Waxaad hubsataa in qof walbo oo adeeg kuu keenaya in uu wato maaski waji duuba (tusaale, farayaamada, nadaafada) haddii ay suurto gal tahayna, waxaad furtaa albaabada/daaqadaha. Haddii adeega dib loo dhigi karo, fadlan dib u dhig ilaa marka aad karantiilka ka baxdo.

**MARNABA HA** aadin goobaha shacabka iskugu yimaado (tusaale, shaqada, iskuulka, maktabada buugaagta, goobaha cibaadada, bangiga, xarumaha bulsho, maqaayadaha, maqayada shaaha, shaleemada, dukaanka qudaarta, iyo moolka adeega).

**MARNABA HA** isticmaalin gaadiidka dadweynaha (tusaale, basaska, tareenada dhulka hoose, tareenka, diyaaradaha, iyo doomaha).

**SAMEY** in aad si joogto ah ula xiriirto qoyskaaga iyo asxaabtada. Isticmaalka taleefanka ama kombiyutarka si aad ula hadasho dadka. Tani waxa ay kaa caawin kartaa in badan kalinimada.

**SAMEY** in aad takto barandadaada, xaga danbe guriga, ama in aad wax yar socoto. Dad faro badan ayaa dareemo in ay ficnaadan marka ay waqti yar oo kooban dibada aadan. Marka aad dibada joogto, uma baahnid in aad xirato maaski laakiin waxaad ka fogaata dadka kale.

**SAMEY** in aad dib ugu dhigato balamahaaga ama kulamadaada waqti danbe mar aadan qabin caabuqa.

**SAMEY** in aad seexato qol aanan cid kale kula dagneyn adiga

**SAMEY** in aad weydiisato xubnaha qoyska ama asxaabta in ay kuu soo adeegan ama raashin kuso iibiyaan adiga.

**SAMEY** in aad xirato maaski waji duub marka aad la kulmeyso
Adeeg Bixiyaha Caafimaad ama aad sameyneyso baaritaanka TB-da.

**SAMEY** in aad u sheegto ambalasta iyo shaqaallaha qolka gargaarka degdega in aad qabto TB haddii aad u baahato gargaar caafimaad degdeg ah iyo haddii aad u baahato in aad dhaqtarka aado.

**SAMEY** in aad furto daaqadahaaga si meesha uga bixiso jeermiska TB-da marka cimiladu wanaagsan tahay.